JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2021

# AF-SOOMAALI

20
21

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomExams

Wadarta guud

Magaca ..............................................

Dugsiga ..............................................

Roll No ..............................................

# JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

## GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA SOOMAALILAND

## FASALKA AF-RAAD

## IMTIXAANKA

### AF-SOOMAALI

**2020/2021**

**WAKHTIGA: 2 SAACADOOD**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan waraaqaha si aad u hubiso.**

TILMAAMO

- Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay 13 waraaqood oo daabacan.
- Tiri imika, oo wergeli horjoogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama dheeraad yihiin.
- Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 5 qaybood:

| | | |
|---|---|---|
| QAYBTA 1AAD: | SHEEKO IYO EREYO | 30 DHIBCOOD |
| QAYBTA 2AAD: | MAANSO | 15 DHIBCOOD |
| QAYBTA 3AAD: | AF-MALDAHANAHA | 15 DHIBCOOD |
| QAYBTA 4AAD: | MAAHMAAHYO IYO NAXWE | 20 DHIBCOOD |
| QAYBTA 5AAD: | CURIS | 20 DHIBCOOD |
| | WADARTA DHIBCAHA GUUD | 100 DHIBCOOD |

- Lama ogola Moobayl iyo waraaqo kale

Q [1aad] (30 dhibcood )

**b) Akhri sheekadan ka dibna ka jawaab weydiimaha ka hooseeya**

Ammintu waxay ahayd casar-liiq ay cadceeddu baalka dhigatay. Cirka qandoodkiisa galbeed waxa isku dalligtay mood galbeed, dhanka barina waxa ka soo gurguuranayey hilmse-hilmse gabbal-dhac oo il-bidhiqsi kasta ka ka dambeeya soo kordhayey. Nafluhu marka habar-dugaag laga reebo, waxa uu dhammaan u sooday hoygiisa. Shimbiro raabe raabe ahaa ayaa iyaguna cirka lalayey.

Xooluhu iyagoo candho iyo calooliba buuxdo oo duduucaya, ayey guriga meesi meesi ugu soo fool lahaayeen. Foodhida caruurta xoolaha soo carraabinaysa iyo heestooda, waxa aad moodaysay fiin meel dheer ka ciyeysa. Haweenkii reerkuna mid kastaaba hawl la soo gudboonatay ayey ku foognayd; maqal xidhxidhid, xaabo soo gurid, awr soo hoyn iyo weel culis.

Haddii ay xoolihii geelli mooyaane, intii kale ay guriga kambalkiisii soo horratay maqashiina mareegta iyo edegga u qaybsantay, ayey rag cutus oo waayeel u badnaa duddada reerka ka salaameen. Gogol ayaa deg deg gole loo waageeray loogu kala bixiyey. "Waar Geelle ; walaal martida ardaaga gee oo sii haasaawi inta aan guriga wax ay afka ku dhuftaan uga soo qaadayo." Rooble ayaa walaalkii ku yidhi. Rooble isla cagidiiba loog ayuu dhegta dhiigga u daray. Kolkiiba Gorof caano ah, kildhi shaah iyo beerkii oo shiilan ayuu Rooble oo inantiisii Cosob la walandeynaysaa raggii golaha ugu keeneen. "Waar bal intan hammuunta ku sii jebiya inta ay hilbuhu inoo bislaanayaan" ayuu Rooble yidhi inta uu inantii caanaha ka qabtay oo uu dhulka qotomiyey.

Warsame oo Martida hormoodkeeda ahaa, weligiina aan hadal u dhuuman ayaa intuu dooyo-xidhka iska furay, qummaatina u soo fadhiistay, isaga oo dhoolla caddaynaya yidhi "Roobloow inkastood loogtay weli waa laguu minan fadhiyaa." Jaamac oo da'diisu labaatanka dhaaftay, martidana ka mid ahaa, intii hore waxa dhacayaba isagu waa moogaa, hasayeeshee, markii ay reer Rooble isa soo dul taageen, ayaa uu hanqalka la soo kacay, oo inta uu xusulka midig dhulka ku muday, Cosob tin iyo cidhib isha ka buuxsaday. Cabbaar haddii kaftan aan turxaan lahayn la



©SLNECB 2021

is weydaarsaday, ayaa Geelle kacay oo alaabtii ururiyey, in yar ka dibna uu keenay waaxyihii loogga oo geedaysan. Laba garangarood inta la isku qaybiyey, ayaa gacmaha iyo middiyaha xeedhada gunteeda lagu arooriyey. "Waar sharii'ine hilibku macaanaa iyo waa darandaaq aanay weligii sako ku baaqsan" weedho kuwaasi ka mid yihiin ayey martidu intay hilibka afka ku haysay isku maaweelinaysay. Markii hilibkii la cunay dufankiina kubabka iyo jeenyaha la isaga tiray, ayaa uu Geelle yimi oo inta uu xeedhyihii soo jiiday oo hilibkii ku hadhay kor u qaadqaaday Warsame ku jeestay isagoo leh "waar waa sidee maxaad hilibka u cuni weydeen yaadse u hambayseen?"

"Waar waxan ku weydiiyey weli ma gabaygii baad waddaa? Xaggee baa wax lagaga tigay raggu waa ka sahay qaatay ninba Alle in uu u qoraye" ayuu Warsame kaftan ahaa ugu jawaabay. Haddii cabbaar kaftan la isku tuurtuuray ayaa habeen wanaagsan iyo wixii waa la beryo lagu kala hoyday.

Cadceeddu markii ay fallaadhaha soo dhawaysay, ayaa uu Rooble saddex waaxood oo hilibkii laga waaberiistay oo si wacan u xarkagay, iyo laba kildhi oo shaah ah soo qaaday oo martidii u keenay. Markii la quraacday dufankii hilibkana xusulada iyo kabaha lagu xooleeyey ayaa ay socotadii ujeedkoodii u af-baxday. Warsame ayaa isaga oo Rooble ku hal-qabsanaya hadalkii furay oo yidhi "Roobloow waxa aanu u soconay arrin aan maanta ugub ahayn ee curad ah, socodkayaguna waxa uu ahaa ina Geelle oo aynu ku xididno guud ahaan, gaar ahaanna Jaamac iyo Geelle"

"Hadal wanaagsan ayaad Warsamoow tidhi waana mid la arki jiray, horena waxa loo yidhi 'gabadhi ama xabaal ku jirtay ama xayn nin ku asturnayde', hadal iyo murtidii gabadhii Hodan ahayd la idin sii. Intii aannu ereygii 'la idin sii' afkiisa ka soo wada bixin ayaa gacan qaad iyo guddoonay lala boobay.

Geelle oo inanta aabaheed ahaa ayaa hadalkii la wareegay oo yidhi " Inantii Hodan sidaa Adeerkeed idiin siiyey ayaan aniguna idiinku hibeeyey, waxase intaas ii raaca inantu weli waa caruur aan gankeed gelin, guri iyo agabkiisna weli uma ebyana kolkaas laba naq waa laga dhursugi doonaa. Yarad isagu waa intii hooyadeed laga bixiyey." Warsame ayaa mar labaad hadalkii la wareegay oo yidhi "Yarad isagu waa ina daanweyne, muddada sugitaankase intaas nooga yareeya 'dheri iyo dumar



©SLNECB 2021

midna yaryaraysi ma lahee." Haddii cabbaar hadalkii la isku celceliyey ayaa konton halaad iyo baarqabkoodii iyo hal sanno oo ay Hodan doonanaato arrintii lagu gebogebeeyey.

**Goobo geli weedh kasta jawaabta ku saxda ah** **(20 dhibcood)**

1. Waxay samaynayeen dumarka reerku markii ay martidu timi
   - b) Maqal by xidhxidhayeen
   - t) Xaabo ayey gurayeen
   - j) Weel bay culayeen
   - x) Intaba

2. "Waa daran-daaq aan sako ku baaqan" waxa looga jeedaa
   - b) Neefka la qalay sako ayuu ahaa
   - t) Geedka daranta neef la daajiyey ayuu ahaa
   - j) Neef ka mid ah xoolo sakadii ku waajibtay laga bixiyey ayuu ahaa
   - x) t iyo j

3. Martida in sidii ay mudnaayeen loo soo dhaweeyey waxa kuu caddaynaysa:
   - b) Way mahad-celiyeen
   - t) Waa loo loogay
   - j) Meel ay seexdaan baa la siiyey
   - x) Intaba

4. Rooble markii uu shaaha iyo caanaha keenay, waxa la socotay
   - b) Cosob
   - t) Hodan
   - j) Marwadiisii
   - x) Midnaba

5. "Inkastood loogtay, weli waa laguu minan fadhiyaa" waxa looga jeedaa
   - b) Waad na maamuustay
   - t) Sidii aanu kaa filanaynay weli maad yeelin
   - j) Inkasood na sooryeysay, weli dantii aanu lahayn way noo dambaysaa
   - x) b iyo t



©SLNECB 2021

6. Weedha ah "Arrintu ugub maaha ee waa curad" waxa looga jeedaa:
   b) Waa wax aan hore loo arki jirin
   t) Waa wax hore loo arki jiray oo caado ah
   j) Waa dhaqan iyo caado dad qalaad laga soo ergistay
   x) Intaba

7. Gebogebadii waxa lagu heshiiyey in guri-galka Hodan la sugo muddo:
   b) Hal naq ah
   t) Laba naq ah
   j) Afar naq
   x) Midnaba

8. Hodan hooyadeed yaradkii laga bixiyey waxa uu ahaa
   b) 5 halaad iyo baar-qab
   t) 100 halaad iyo baarqab
   j) Inta inanteeda laga bixiyey in leeg
   x) Sheekadaba kuma xusna

9. Weedha ah "Gabadhi ama xabaal ku jirtay ama xayn nin ku asturnayd"
   b) Waa hadal murti ah
   t) Waa maahmaah
   j) Waa hal-qabsi
   x) Midnaba

10. Hodan ninka ay marwadiisa noqon doontaa waxa la odhan jiray:
   b) Rooble
   t) Warsame
   j) Jaamac
   x) t iyo j
   kh) Midnaba

©SLNECB 2021

T) Ereyadani siday sheekada ugu jiraan ku macnee kuna hor qor:(10 dhibcood)

1. Naq ______________________________

2. Loog ______________________________

3. Moodda galbeed ______________________________

4. Hamuun ______________________________

5. Xarkagay ______________________________

**$Q^{2aad}$: MAANSADA**

**(15 dhibcood)**

1. Fircoonkii wasiilada jannada waadiyada jeexday
   Waarsiimo abid waa jeclaa waase noloshiiye
   Rag kalaa wareegto ugu hadhay walaxdii xooleed

b) soo koob dulucda guud ee tuducyadan kor ku qoran

______________________________
______________________________
______________________________
______________________________
______________________________

2. Hasha jilica iyo qaalintaad wada jalleecayso
   Jidba maaha xoolaha inaad wada jeclaataaye
   Mid ku joogso la iskuma darsado laba jidhaamoode



©SLNECB 2021

b) Soo koob dulucda guud ee tuducyadan kor ku qoran

3. "Toomaha walwaaleed anoo torog ku maalaaya
Anigoo tusmada reerkayaga talada goynaaya
Taajkiyo garoomada anoo la igu wada tiirshay
Ayuun baa la ii tumay durbaan taarna ii yimi"

b) Soo koob dulucda guud ee tuducyadan kor ku qoran

t) Tuduca u dambeeya iyo maahmaahda ah 'Belaayo guur ama guurso ayey ku tidhaa' xidhiidhka ka dhaxeeya si kooban u sheeg.

4. Inkastood adduun badan dhaqdiyo dheemman iyo daaro
Inkastood dhar wada suufa iyo dhag iyo laas qaaddo
Dhaxal ma leh nin soomaaliyoon dhaqanin koorreeye

b) Soo koob dulucda guud ee tuducyadan kor ku qoran



©SLNECB 2021

5. "Dhuuxayga iyo feedhaha ayey dhudi ku laaqnayde
Sidii igadh maqaar loo dhigay ii dul dheremayde
Inkastooy dhallaan yeelatiyo ubad dhawaaqaaya
Dhimashadu ha joogtee si kale waw dhursugayaaye
Dhufsataye qalbiga ma anigaa dhudi ka reebaaya?"

b) Soo koob dulucda guud ee tuducyadan kor ku qoran

t) Xagga hoose ku qor tuduca sheegaya in gabadha gabyaagu calmaday nin kale guursaday

Q[3aad] **Af-maldahanaha** **(15 dhibcood )**

Akhri tuducyada soo socda, mid kastana ka jawaab weydiimaha hoos yaalla

1. "Gudcurkaba dayaxa loo tasow loona wada taahye
Markaan tago ninkii aan I tirin saw I tebi maayo"

b) Sheeg Af-maldahanaha ku jira

t) Sababee doorashadaada

2. Dhabaq dooday baa yidhi
"Damac lama wadaagee
Dano aan ku qabo baan
Dacarta uga guud baxay"


©SLNECB 2021

b) sheeg af-maldahana ku jira

t) Sababee doorashadaada

3. "Weligiba cils sooma rogan ciro dinreede
Marka ay cidhiidhiga gashuu caano leeyahaye
Gurxan caynabkiisii miyuu calaha jeexsiiyey?"

b) sheeg af-maldahana ku jira

t) sababee doorashadaada

**Q[4aad] Maahmaahda iyo Naxwaha** **(20 dhibcood )**

**B. Maahmaahda** **10 dhibcood**

1. "Geesi il buu diriraa"

b) falanqee goorta iyo ujeedka loo cuskado maahmaahdan.



©SLNECB 2021

t) "Biyo kaa badan iyo col kaa badan labaduba way ku hafiyaan"

sharax kooban ka bixi xidhiidhka ka dhexeeya maahmaahda 'b' iyo maahmaahda 't'

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

2. " Laba geedka ma wada tagaan; gartaada iyo gaashaankaaga" iyo "Naf go'day iyo roob galbeed midna gadaal uma soo noqdo"
Si kooban uga hadal labadan maahmaahood ee labaleyda ahi, waxay isaga mid yihiin iyo waxay ku kala duwan yihiin.

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

**10 dhibcood**

**T. Naxwaha**

Siday isku leeyihiin isugu beeg qodobada ku kala jira taxa 'B' iyo 'T'

B

1. Qodob aqoonsi guud
2. Qodob aqoonsi gaar ah
3. Qodob aqoonsi tusmeed (dhaw)
4. Qodob lahaansho wadareed

T

x. keenna
kh. Kii
d. Ka
r. kan

©SLNECB 2021